Somali - Soomaali

# Tusaha Dadka Cusub ee Adeegga Boliiska Kaalgari



# Xafiisyada Adeegga Boliiska Kaalgari

**Calgary Police Service Headquarters Westwinds**
5111 47 St. N.E.
Isniin ilaa Jimce 7 a.m. - 6 p.m.
Xiran usbuuc dhamaadka & fasaxyada
Tal: 403-428-2200

**District 1 - Ramsay**
1010, 26 Ave. S.E.
Isniin ilaa Axad 8 a.m. - 8 p.m.
Xiran fasaxyada
Tal: 403-428-6100

**District 2 - Rosscarrock**
4506, 17 Ave S.W.
Isniin ilaa Axad 8 a.m. - 8 p.m.
Xiran fasaxyada
Tal: 403-428-6200

**District 3 - North Haven**
4303, 14 St N.W.
Isniin ilaa Axad 8 a.m. - 8 p.m.
Xiran fasaxyada
Tal: 403-428-6300

**District 4 - Franklin**
3207, 12 Ave N.E.
Isniin ilaa Axad 8 a.m. - 8 p.m.
Xiran fasaxyada
Tal: 403-428-6400

**District 5 - Saddle Ridge**
800, Saddletowne Circle N.E.
Isniin ilaa Axad 8 a.m. - 8 p.m.
Xiran fasaxyada
Tal: 403-428-6500

**District 6 - Fairview**
8325, Bonaventure Drive S.E.
Isniin ilaa Axad 8 a.m. - 8 p.m.
Xiran fasaxyada
Tal: 403-428-6600

**District 7 - Country Hills**
11955, Country Village Link N.E.
Isniin ilaa Axad 8 a.m. - 8 p.m.
Xiran fasaxyada
Tal: 403-428-6700

**District 8 - Midnapore**
450, Midpark Way S.E.
Isniin ilaa Axad 8 a.m. - 8 p.m.
Xiran fasaxyada
Tal: 403-428-6800

**Airport Corporate Centre**
1601 Airport Road N.E.
Tal: 403-735-1200

**Chinook Centre Mall Community Station**
6455 Macleod Tr. South
Isniin ilaa Jimce 10 a.m. - 9 p.m.
Sabti 10 a.m. - 6 p.m.
Axad Xiran
Tal: 403-428-5810

**Market Mall Community Station**
3625 Shaganappi Tr. N.W.
Isniin ilaa Sabtidii 9 a.m. - 6 p.m.
Axad Xiran
Tal: 403-974-0511

**Victoria Park Station**
334 - 11 Ave. S.E. (Downtown)
Isniin ilaa Jimce 8 a.m. - 5 p.m.
Tal: 403-428-5500

**CPS Traffic Section**
6528, 11 St. N.E.
Isniin ilaa Jimce 8 a.m. - 4 p.m.
Xiran usbuuc dhamaadka & fasaxyada
Tal: 403-428-4000

## Gogoldhig

Tusmadan sharxi doonta mas'uuliyadda Adeegga Boliiska Kaalgari, isuguna jirta:

- Goorta iyo sida loola xiriiro Boliiska
- Waxaad filan kartid haddaad qaabisho ama ku wareystaan Boliiska
- Dambi Reebid
- Xirfadaha Badbaado

## Arrimo ku saabsan Adeegga Boliiska Kaalgari

Adeegga Boliiska Kaalgari waxay u adeegtaa magaalada Kaalgari.

Waxaan la shaqeynaa hay'adaha kale ee adeega iyo reer Kaalgari si aan u dhowrno dadka ku nool, ka shaqeeya iyo kuwa soo booqda ugana dhigno magaalo nabad ah.

Adeegga Boliiska ee Kaalgari dadka wuu xurmeeyaa, meel kastoy ka yimaadaan ama intey doonaa ha ku noolaadaan Kanada.

Adeegga Boliiska Kaalgari waxaa ma'suuliyad ka saaran tahay:

- Difaaca dadka iyo hantidooda
- Sugidda nabadda iyo nidaamka
- Reebidda iyo baaridda dambiga
- dhaqan-gelinta sharciyada baladka, gobolka iyo dalka

# Xiriirka Adeegga Boliiska Kaalgari

**Deg-degga:** 911
**Caadiga:** 403-266-1234
**Website:** www.calgarypolice.ca
**Twitter:** @calgarypolice
**Facebook:** Calgary Police Service

## Kooxda Kheyraadka Kala-duwanaanshaha

Kooxdan waa midda ugu horreysa ay la xiriir karaan dadka baahi khaas ah leh dhaqankooda awgii. ugu horreyn kooxdu waxay diiradda saartaa, iyadoo la kaashaneysa wax-barashada iyo is-xiriirinta, inay abuurto bulshooyin nabad ah oo lagu wada jiro, lana shaqeyso saraakiisha kale ee boliiska iyo muwaadiniinta si loo xalliyo aarrimaha bulshada khuseeya

Bulshooyinkan ayaa loo qoondeeyay xubin ka socota Kooxda Kheyraadka Kala-duwanaanshaha:

- Dadka Aborijinka ah
- Afrikaanka
- Caribbean and Latin Americas
- Bariga Dhexe iyo Yurub
- Koonfur Aasiya
- Koonfur-Bari Aasiya
- Dadka Naafada ah
- Jinsaaniyadda iyo Jinsi Duwanaanshaha
- Aqoonta Kala-Duwanaanshaha
- Isu-duwaha danbiyada naceybka

## Sideed ku aqoonsan kartaa saraakiisha boliiska

Saraakiisha boliiska ee kaalgari waxay xirtaan direys kala duwan. Direyska boliiska waxaa garabka uga dhaggan calaamad ay ku qoran tahay “Adeegga Boliiska Kaalgari”, dushoodana ereyga “POLICE” ayaa ku taal.

Baabuurta boliiska waxey ku leeyihiin nalal buluug iyo gaduud ah dusha iyo fuqa hore.

Mararka qaarkood, laga yaabaa inaad la kulanto saraakiil boliis ah oo aan direys xirneyn. Waxaa laga rabaa iney calaamad iyo sawir lagu aqoonsado sitaan. Haddii lagu joojiyo ama qof ku yiraahdo waxaan ahay boliis laakiin uu shaki kaa galo, waxaad weydiin kartaa inuu ku tuso aqoonsigooda.

Arrin degdeg ah haddey ku asiibto ama haddaad dareento khatar inaad ku sugan tahay waxaad wici kartaa 9-1-1.

## Xuquuqda aad leedahay ee Kanada

Kanada gudaheeda, Axdiga Xuquuqaha iyo Xorriyadaha waa qeyb ka mid ah dastuurkeenna oo u damaanad qaadeysa qof kasta xoogaa xuquuqyo ah.

Markey noqoto inaad boliis qaabisho, Axdigu wuxuu ka doonayaa sarkaalkii ku joojiya inuu kuu sheego sababta uu kuu joojiyay. Haddii lagu xiro iyagoo u heysta inaad dambi gashay, waxaad xaq u leedahay inaad diiddo su'aalahooda inaad ka jawaabto (sideedaba, waa inaad is caddeysaa qofkaad tahay si nabad lehna u raacdaa), waxaad kaloo xaq u leedahay in aad qareen la hadasho sida ugu dhaqsa badan ee suuragal ah.

Kanada boliiska waa tallaabada koowaad ee nidaamka caddaaladda. Qofkuu boliis xiro ama tigidh la siiyo waxaa loo citibaarshaa inuu bari yahay dambiga ilaa ay maxkamad madax bannaan ku caddeyso inuu dambiile yahay ama uu qirto dambiga.

## Sida Boliiska Kaalgari loola Xiriiro

Waad la xiriiri kartaa Adeegga Boliiska Kaalgari si ugu sheegto dambiyo ama arrimo shaki dhaliyay. Xaalad deg-deg ah, wac 9-1-1. Xaaladaha deg-degga waa:

- Naftu halis gasho
- Hantida oo wax loo geysto ama la xado
- dambi socda hadaad aragto

Markaad wacdo 9-1-1, shaqaalaha wuxuu ku weydiinayaa faahfaahin xaaladda ku saabsan. Haddaadan Ingiriis ku hadlin, u sheeg shaqaalaha luqadda aad ku hadasho iyagaa kugu xiraya tarjumaan. Haddaad shaqaalaha la hadli karin isla markiiba sarkaal boliis buu u soo dirayaa cinwaanka taleefanka ka soo dhacay si loo hubsado nabadgalyadiinna.

U sharax caruurtaada sida iyo marka la waco 9-1-1.

Haddaad wacdo 9-1-1 si qalad ah, fadlan ha dhigin taleefanka una sharax shaqaalaha sababta. Haddaad ku dhigto, boliiskaa imaanaya nabadgalyadaada awgeed.

Kala hadal Adeegga Boliiska Kaalgari xaaladaha aan deg-degga aheyn, taleefanka (403) 266-1234.

Ha ka baqin inaad boliiska wacdo haddii xaalad nabad darro ku soo wajahdo. **Boliiska ood wacdaa sharcigaad dalka ku joogta wax uma dhinto.**

**Dambi Ka-hortagayaasha (Crime Stoppers)**

Dambi Ka-hortagayaashu waa tabarruciin, barnaamjiyo deeqeed oo ay wadaan dad bulshada ka tirsan oo iskaa-wax u qabso sameeya. Branaamjika wuxuu ku saleysan yahan dadka in lagu dhiirri galiyo iney ka qay galaan la dagaallanka dembiyada. Dambi Ka-hortagayaashu waxey muwaadinka u sahlaan inuu si qarsoodi ah war uga siin karo boliiska dembiyada uu og yahay ama tuhmayo isagoon cidi ogaan. Sirta loo keeno Dembi Ka-hortagayaasha waa ballan in la qariyo. Dembi Ka-hortagayaashu  ma arkaan nambarkaaga haddaad wacdo mana daba geli karaan taleefankaada, mana duubaan codka. Dembi Ka-hortagayaasha waxaa farriin loogu diri karaa sida soo socota:

**La Hadal:** 1-800-222-8477
**Text:** TALADA 274637
**Website:** www.calgarycrimestoppers.org



## Wadidda iyo sharciyada taraafikada

Gaari in lagu wato Kanada(sida baabuur, mooto ama gaari ganacsi), waxaad u baahan tahay laysanka darawalka oon dhicin (loo yaqaan laysanka wadidda). Waxaana laga qaataa xaffisyada diiwaanka gawaarida. Laysanka waxaa lagu siini markaad ku baasto imtixaan isugu jira qoraal iyo waditaan gaari.

Gawaaridoo idil waa iney diiwaan gashan yihiin ayna caymis leeyihiin. Waxaa saaraan darawalka inuu hubsado gaariga inuu diiwaan gashan yahay caymisna ku jiro, xitaa hadduusan laheyn gaariga uu wato.

## Gafafka Taraafikada

Hadduu boliis gaarigaada joojiyo, istaag meel ammaan ah, ku jir gaariga haddaan amar kale lagu siin. Daji daaqadda markaa boliiska ayaa imaanaya dhinacaaga. Mararka qaarkood dhowr sarkaal baa ku joojin kara, hala fajacin haddaad aragto sarkaal kale oo dhinaca rakaabka kaaga yimaada.

Sharci ahaan, waa inaad soo saartaa:

1. Laysinkaaga Waditaanka
2. Diiwaanka gaariga aad wadato
3. Caymiska gaariga aad wadato

Badanaa gafafka taraafikada waxaa ka mid ah:

- Ku socosho xawli xad dhaaf ah
- Inaad calaamadda joojinta ama nalka cas gudubto
- Waditaan jahawareer ka muuqdo
- Suunka inaad xiran weydo

Sarkaalka boliisku wuu kuu sharxayaa sababtuu kuu xayiray. Waxaad heli kartaa warqad lagaaga yeerayo maxkamadda taraafikada (loo yaqaan tigidh), ama inuu afka kaaga digo gafka waditaanka ee aad gashay. Sarkaalka ma siineysid ganaaxa lacageed, marna ha u taagin sarkaal boliis wax lacag ah. Wixii tigidh ah waxaa laga bixiyaa Maxkamadda Gobolka, xafiiska diiwaangelinta ama internetka.

Waad door bidi kartaa inaad ka dooddo tigidhka aadna hor joogsato Garsoora-ha gobolka ee taraafikada. Waad muddici kartaa kiiska oo garsoore ayaa go’aan soo rogaya inaad eedda gashay iyo in kale. Habka maxkamad ee Kanada waa caddaalad, qof walba xaq buu u leeyahay in arrintiisa taraafikada maxkamaddu maqasho.

## Waditaan aan Feejigneyn

Wadid feejignaan la'aan ah waa ka mamnuuc Alberta gudaheeda. Sida:

- Isticmaalka qalabka elektaroonikada sida laabtobyada, ciyaaraha fiidiyoga, taleefannada gacanta, kaamaradaha
- Texting-ka ama email-ka
- Gelinta macluumaadka ee GPS
- Wax aqrinta adoo gaariga wada
- Qoritaanka, daabicidda ama sawiridda
- Is qur-qurxinta adoo gaari wada

Ciqaabta wadid feejig la'aaneed ee Alberta waa ganaax 3 dhibcoodna waad lumin doontaa. Faahfaahin dheeri ah, booqo Gaadiidka Dawladda Alberta website-kooda http://www.transportation.alberta.ca/distracteddriving.htm.

## Waditaanka adigoo maandoorsan

Sharciga ayaa diiddan inaad gaari ama mooto waddo adiga oo ku maandoorsan qamri ama daroogo. Darawalka waa la xiri karaa gaarigana boliiska baa qaadaya gefkanoo kale. Waditaanka adoo maandoorsan waxey keeni kartaa inaad dambiile noqoto laysankana lagaa xayiro. Haddi dambiga laguugu xukumo waxaa kugu dhacaya ganaaxyo culus iyo/ama xarig. Laysankaagana waa lagaa qaadi karaa iyo weliba sidaaad dib ugu hesho wey dheeraan kartaa, adag tahay waana qaali.

Lahaanshaha Laysinka waa mudnaan ee xuquuq ma aha. Sharciyada waditaanka Alberta waa badan yihiin, waa inaad ogaato aadna adeecdo.

## Badbaadada jidka iyo dadka lugeynaya

Waa muhiin inaad taxaddarto markaa jidka goyneyso – xusuusnow oo fiiri labada dhinac. Ka gudub jidka keliya meesha calaamadda ka-tallowga ku qoran tahay, haddaad baaskiil saaran tahay ka deg oo lugee adoo gacanta ku riixaya baaskiilkaada. Mar walba xiro koofiyadda adag (helmet) hadaad baaskiil waddo. Sharciyan, qofkii 18 ka yar ee baaskiil wata waa inuu koofiyad (helmet) xirtaa.

## Ka-hortagga dambiga iyo badbaadada

Tallabooyin badan baad qaadi kartaa si aad u xaqiijiso badbaadada naftaada iyo si aadan u noqon dhibbane dambi loo geysto.

### Badbaadada shaqsiga

Ku fikir inaad la socoto hareerahaaga waxa ka dhacaya si qatarta weerar aad isaga jirto. Arrimahan muhiimka ah maskaxda ku hay:

- Ha qaadan lacag badan ama alaab qaali ah hana dhigin gurigaaga. Istic-maal oo dhigo bankiga si aad maalkaaga u badbaadiso.
- Ku lugee waddo dad buuxaan oo iftiin badan, qaadana aalad alaarmi leh ama jabaq bixin karta.
- Sido taleefanka gacanta mar walba haddaad karto.
- Haddaad dareento in lagu daba socdo, dhex joog meel dad buuxaan ama wac boliiska 403-266-1234 una sheeg wixii aad ka shakido.

Haddaad qatar ku dhowdahay ama qof kale galo, wac 9-1-1.

### Musuqmaasuq iyo dambi dhaqaale

Markuu qof been kuu sheego si aad u siiso lacag ama hanti (aanad siiseen hadd-aad runta ogtahay) waxaa loo yaqaan qiyaano musuqmaasuqeed. Musuqmaas-uqu waa dambi dhaqaale oo urug ku ah in badan oo Kanadiyaanka cusub ah.

Musuqmaasuqu noocyo badan ayuu yeelan karaa sida:

- Hey'adda Canshuurta Kanada(CRA) magaceeda kuwa ku qaraabta oo dhibbanayaasha taleefan u dira iyagoo sheeganaya inay yihiin "canshuur uruuriyeyaal" una hanjaba si ay lacag uga dhurtaan.
- "Wax-gate Qarsoon" wuxuu wax u qiyaanaa markuu warqad boosto helo dhibbanaha la leeyahay waa la idin "soo xushay" inaad si dahsoon wax u gadataan barnaamij ah.
- Lacago-been ah isticmaalid uu ganacsadaha, dukaanlaha, ama qofka uu helo lacag la been-abuuray meeshuu lacag run ah ka ha heli lahaa.
- Kaarka bakiga ee wax lagu bixiyo oo lagu dhaco qofka oo si sharci-darro ah loo helo bankigiisa ama karedhid kaarkiisa si loo sameeyo karedhid kaard been ah, ama akoonkiisa lacag laga baxsado.
- Dhac maalgelimeed oo noocyo badan, dad badanna dambiiluhu ku yiraahdo maalgashada ganacsi, mashruuc, ama heshiis hanti ma-guurto ah.

Si aad uga badbaaddo musuqa iyo dambi dhaqaale, waa inaad maskaxda ku heysaa talooyinkan:

- Bankiga markuu kaadh wax lagu bixiyo ku siiyo, waxaa kaloo lagu siiyaa nambar sir ah “PIN” si aad wax ugu istcmaasho kaadhka. Waa mas’uuliyad ku fuusha inaad ilaaliso nambarkaaga sirta ah PIN. Qofna ha la wadaagin nambarkaaga, xitaa hadday ku weydiistaan.
- Ha maalgashan wax aadan ama aad ku jahawareerto.
- Ha saxiixin heshiis ama waraaqaha maaliyadda aad is tiraahdo waxbaa ka qaldan.
- Naftaada warbixinteeda ha siin qofna, hana siinin urur aadan garaneyn.
- Hay’adda Canshuurta Kanada qofka uma wacdo canshuur bixin. Ha ka jawaabin codsiyada noocan ah, lana xiriir oo u sheeg Boliiska dhacdada hadduu qof dawladda sheeganaya lacag kaa dalbado.
- Haddaad ka shakido sax ahaanteeda lacag ama jeegag aad heshay, inaad qaadato qasab ma aha. Hadaad ka shakido, la xiriir bankiga ama boliiska.

## Dambiga Elektaroonikada (Cybercrime)

Dambiga Elektaroonikada laasim waa mid loo isticmaalo kombiyuutarka iyo internetka. Dambiyada elektaroonikada waxaa ka mid ah khiyaanooyin la xiriira arrimo xun-xun (malware) ama jabsiga (hacking), tekiska jinsiga (sexting) iyo filimada qaawanida (pornography) ah.

Si aad ku badbaadiso naftaada iyo qoyskaaga qiyaanada internet-ka iyo email-ka:

- Ha furin lifaaqyada hana kalik-siin linkisyada (links) ka yimid meel aadan aqoon.Waxaa dhich karta inay faayrasyo ku jiraan dhaawici kara kombiyuutarkaaga.
- Ka shaki email-yada ku weydiista kalmaddaada sirta (password) ah ama wax ku quseeya. Ururrada sharciga ah kuma weydiiyaan warbixin email dhexdiisa.
- Ku isticmaal kombiyuutarkaaga barnaamij la dagaala faayraska (anti-virus), darbi dabeed (firewall), isbaam xannibe (spam blocker) iyo jaajuus-liddi ku ahe (spyware) sooftaweer. Sooftaweerkaaga ka dhig mid waqtiga la socda.
- Mar walba ka bax email-kaaga markaad howshaada dhameyso.
- Ha ku dirin sawirro xasaasi ah, wax shaqsi ah, warbixin maaliyad ama sir ah email-ka ama farriinta deg-degga ah.

**Ilaalinta caruurta ee internetka**

Haddaad caruur qabto, ka aamin geli internetka oo raac talooyinkaan:

- Xafid oo ha furnaado xiriirka u dhaxeeya waalidka iyo carrunta.
- Dhig kombiyuutarka internetka leh meel aad ka arki kartid waxay carrurtu sameeynayaan, xayir internetka marka uusan kormeere joogin.
- Ku adkee caruurtaada inay ogaadaan in aysan marna ka dhiibi karin wax shaqsi ku saabsan internetka, ha ahaato qolalka lagu sheekeysto, sahammada (surveys) ama websaatyada. Inaysan qof internetka ay ka barteen aanay kula heeshiin la kulan.
- Hadday arkaan ama aqriyaan wax cara galiya, bar caruurta inay joojiyaan isticmaalka internetka isla markiiba kulana tali inay u sheegaan waalidka.

Haddii adiga ama canug kaa ah uu dhibbane noqdo oo dambi internetka soo asiibo, fadlan ka wac Adeegga Boliiska ee Kaalgari ee aan deg-degga ahayn nambarka 403-266-1234 si aad ugu sheegto dambiga. Miirashada jinsiga ee internetka (online sexual exploitation) ee caruurta si deg-deg ah waa inaad ugu sheegtaa Adeegga Boliiska ee Kaalgari. U wac 9-1-1 dambi kasta oo lagu guda jiro ama xaaladdii nafta halis u ah, waxaad u sheegi kartaa oo kale dambiyada noocan ah Xarunta Badbaadada Caruurta ee Kanada.



## Xad-gudubyada qoyska ka dhex dhaca (Domestic Violence)

Kanada waa sharci-darro in jirkooda wax loo geysto qof qoyskaaga ka tirsan, iyo in la burburiyo ama la xado hanti uu leeyahay qaan-gaar qoyskaaga ka mid ah. Iyadoo sharcigu oggol yahay in waalidku edbin karaan caruurtooda, baa haddana xadad loo yeelay nooca edbinta ee macquulka ah.

Waxaa kaloo sharci-darro ah inaad cilaaqaad galmo la yeelato qof kuu oggolaada mooyee, xitaa haddaad is qabtaan ama wada socotaan.

Adeegga Boliiska ee Kaalgari wuu ka jawaabaa baaraana dhacdooyinka loo wargeliyo ee rabshada qoyska dhexdiisa ah ama xiriirrada gudaha. Xiriirradaas waxaa ka mid ah:

- Xiriirka lammaanaha sida mid cusub ama xiriir shukaansi oo hore
- Xiriir wada noolaansho cusub ama mid hore
- Xiriir guur cusub ama mid hore
- Qaraabo dhow iyo mid fogba (sida caruurta, walaalaha, awow iyo ayeey)

Xiriirka Gudaha waxaa ka mid ah kan dadka waaweyn ee jira 65 iyo ka badan iyo qaraabo dhow iyo kuwa fog.

Xadgudubka Gudaha wuxuu yeelan karaa noocyo badan kumana eka rabshad. Noocyada kale ee xadgudubka waa mid jinsi, maaliyad, hanjabaad, eray xun iyo dareen-jabis. Xadgudubka gudaha waxaa kaloo ka mida kiisaskan:

- Waaalid ka qaadanaya waalid kale caruurtoodii
- Daba-gal ama Hagardaamo
- Rabshad ku Salaysan Sharaf: waa dambi lagu ilaalinayo ama dhowrayo sharafta qoyska ama bulshada

Adeegga Boliiska ee Kaalgari wuxuu qabaa Unugga Iska-horimaadka Gudaha kuna takhasusay reebidda, dhimidda iyo dhaqan-galinta sharciyada ku heed-aaman rabshada gudaha. Xadgudubka gudaha gaar uma aha dhibbanayaasha dheddigga ah oo keliya ee waxaa sidoo kale dhibbane noqon kara ragga, caruur-ta, iyo duqeyda.

Adeegga Boliiska ee Kaalgari wuxuu ku boorrinayaa qofkii ka tabanaya ama ka marqaati noqda rabshad gudaha ah ama xad-gudub inuu soo gaarsiiyo boliiska, tas-hiilaadka caafimaadka, ama mid ka mid ah hay'adaha bulshada ee Kaalgari ee wax taageera, bixiya talo iyo kaalmo. Waxaa jira xirfadlayaal diyaar u ah iney kaa caawiyaan dhibta aad ku jirto; caawintu waa noocya badan sida baaritaan dambi oo boliis ilaa iyo hay'ada kaloo bixiya taageero qoys xilliyada adag ee kala-guur-ka.

**Dhibidda waayeelka iyo badbaadinta duqeyda**

Dhibka waayeelka loo geysto waxaa ka mid ah dayacid, jirkoo wax loo geysto, dhibka fara-xumeynta iyo galmada, maal-dhac iyo qaababka kale ee rabshadda gudaha. Xadgudubka iyo dhibka qaababkan leh wuxuu wax gaarsiiyaa duqeyda (jira 65 iyo ka weyn). Mid ka mid ah noocyada u badan ee dhibka waayeelka loo geysto waa dhibka maal-dhaca ah. Wuxuu isugu jiraa musuq iyo qiyaano looga gurto lacagta duqeyda.

Tusaale ahaan qiyaanooyinka waxaa ka mid ah:

- Guri Dayactirid aan jirin oo qiyaano ah oo qandaraasle daacad-laawe ah kula heshiiyaan gurigoo la hagaajiyo markii lacagta loo hormariyana, ma dhameystiraan shaqadii ama waa dhuuntaan.
- Ayeey iyo Awow la qiyaano oo dambiiluhu waco iskana dhigo inuu yahay canug ay awow ama ayeey u yihiin oo ka soo wacaya dibadda Kaalgari oo shil uu galay dartiis lacag ugu baahan.
- Jaceyl abuur qiyaano ah oo khaa'inku dhiigmiirto duqeyda isagoo jaceyl u ballan qaadaya iyadoo ujeeddaduna tahay in lacag laga dhaco.
- Qiyaano bakhtiyaanasiib ah oo inta la waco duqeyda lagu yiraahdo wax-aad hesheen bakhtiyaanasiib waxaase shuruud ah inaad xoogaa kharash ah dhiibtaan si aad u heshaan hadiyadda.

Xadgudubka iyo dhibka waayeelka loo geysto waxaa ka mid ah dareen dhaawi-cid (qalbi jab), dhibka fara-xumenyta iyo galmada, iyo ku-xadgudub daawo. Tusaalooyinka qaarka mid ah noocyada xadgudubka waa:

- Loo diido caruurta caruurtoodu dhaleen
- Dharbaaxid
- Sirtoodoo la bandhigo
- Daawo ka tan badan oo la siiyo
- Dadka booqanaya oo loo diido

In lagaa caawiyo xad-gudubka qoyska iyo dhibka waayeelka la xiriir:

**Boliis/aambalaas/dab degdeg ah leenka:** 911
**Boliis aan degdeg aheyn leenka**: 403-266-1234
**Xarunta Mixnadda:** 403-266-4357
**Kaalgari Konnekti:** 403-234-7233 (Kaalgari), 1-866-606-7233 (Alberta)

## Burcadda iyo dambiyada abaabulan

Burcad waa urur, is-kaashato ama koox ku lug leh falal dambiyeed (ama looga shakiyay falal dambi) si joogto ah. Badi burcadda Kaalgari waa dhallinyo qaan-gaar ah. Burcadda Kaalgari waxay ka howl galaan magaaladoo dhan, mana laha xaafad u gooni ah. Horraantii waxey ka shaqeeyaan gaditaanka daroogada, ka mid tahay kookeynta, karistal meth, ekistasi iyo xashiishadda. Sidoo kale, dambiyadooda waxay ku lug leeyihiin karedhit kaarka dhicid iyo isticmaalka hubka. Burcadda waxay isticmaalaan hubka iyo rabshad si sumcaddooda u dheeraato una korodho hawlahooda dambiyada.

Calaamaadka lagu garto dhallinta ku lug leh burcadda waxaa ka mid ah:

- Xiiso badan uma haynayaan howlaha qoyska
- Dabeecad tii hore ka baddalan ama saaxiibo kala duwan
- Lacag badan bay heystaan, dhar qaali ah ama hanti aan la garaneyn

Sida looga reebi karo ilmahaaga inuu faraha la galo burcad waxaa ka mid ah:

- U qorshee qoyska waqtigiisa
- La qaado waqti u gooni ah canug kasta
- Kala hadal caruurtaada sida loo maareeyo cadaadiska saaxiibada
- Aqoon u yeelo canuggaada saaxiibadiis iyo waalidkooda
- Intuu yar yahay ilahaaga wax bar
- Kobci kalsanida canuggaada iyo dad la dhaqankiiss

Haddaad adiga ama gacalkaagu u baahataan in lagaa caawimo inuu ka baxo burcadda, fadlan la xiriir Khadka Caawinta Burcadda 403-428-8191.

## SooCelis (ReDirect)

SooCelis waa barnaamij ka hortaga waxna bara dhallinta yar iyo kuwa weyn oo u nugul xag-jirka, inta aysan qaadan oo niyoon fikradaha xagjirnimada.

### Xagjirnimada iyo Ku fogaanshaheeda

- Waxay dhacdaa markuu qof ama koox isku daydo inay curiyaan isbeddel siyaasi ama bulsho iyagoo isticmaalaya oo kaashanaya rabshad si ay u gaaraan ujeedooyinkooda.
- Uma hoggaansamaan asaaska iyo mabaadii'da dimuqraadiyadeed ee sharciga waafaqsan.
- Gaar uma aha deegaan, bulsho ama koox dhaqameed.
- Wuxuu ka dhex curan in badan oo dhiirrigelin fikradeed iyo asbaab ah.

Waxaa jira tilmaamo adag oo lagu garto qofka dhallinta ah ee u nugul xagjirnimada ama ku fogaanshaheeda. Waxaa dhici karta inaad isbeddel ku aragto saaxiib ama gacalkaa aadna aqoon waxaad fasho. SooCelis yaa ku caawin karta.

Waa sir haddaad qof noo sheegtaa. Dhallinta la macaamiisha SooCelis kuma qasaarayaan macaamiilkooda.

Warbixin dheeri ah ee SooCelis (ReDirect) booqo www.redirectprogram.ca.

## Daroogada iyo isticmaalkeeda

Kanada sharciyo adag bey u saartay daroogada. Daroogooyin badanbaa mamnuuc ah oo sharciga ciqaab ku leh. Haysmada daroogada, ganacsigeeda, ama soo saarkeeda wuxuu kugu furaa in dambi laguu diiwaan geliyo ama xabis gashid. Haddii dambi daaroogo laguugu xukumo, dalalka qaarkood ma gali kartid.

Isticmaalka daroogada dhibkeedu ma yara. Noloshaada ayay waxyeeleyn kartaa, tan saaxiibbadaa, reerkaada iyo bulshadaada. Xubin kasta oo jirkaaga bey daroogadu wax gaarsiin kartaa. Dhibka waxaa ka mid ah iyadoo wax u dhinta nidaamka jirkaaga isku difaaco, xaaladaha wadnaha, dhaawac beerka, suuxdin, dhiig furmid, iyo dhaawac maskaxda. Xusuusta xitaa way qatar gelisaa, sababtaana ruuxu isuu isdilo, buufis, wax aan jirin istusid, daroogadoo kaa tan badata iyo dhimasho.

Daroogadu noocyo badan bey leedahay, sida kiniin, budo, dareere, nacnac ama dhir. Mar walba ma cadda daroogada waxa ku jira. Inaadan qaadan baa dhacda waxaad u heysato inay tahay. Daroogada qaar waxaa laga sameeyaa walxo qatar ah sida sunta barafeynta looga hortago (antifreeze).

Daroogadu ma wada xuma, daawooyinka laguu qoro way ku halis galin karaan hadaad u qaadan weydo sidii dhaqtarku ku faray. Hadaad daawada si sax ah u qaadan weydo waxay keentaa jirkaaga inuuu barto oo qabatimo. La hadal dhaqtarkaaga ama xirfadle caafimaad intaadan qaadan daawada.

Haddaad isbeddel ku aragto qoyska iyo asxaabta, aadna is tiraahdo daroogay isticmaalayaan, ama isku badiyeen la hadal xirfadle caafimaad.

Haddaad ku aragto aaggaada dad ka ganacsada daroogada la xiriir boliiska ama Dambdi Jojiyeyaasha.

## Adeegyada Dhibbanaha

Gargaarka iyo Caawinta Dhibbanaha (VAST) ee Adeegga Boliiska ee Kaalgari wuxuu kaalmeynayaa dulmanaha iyo dhibka kan loo geysto. VAST waxay caawineysay dadka la dulmiyay ee dhibka gaaray ee reer Kaalgari laga bilaabo 1977. Ujeeddadeedu waa inay dhinto dhibta gaarta qofka la dulmay iyadoo dareensiineysa in lala safan yahay, loo dhaga nugul yahay, lana caawinayo si ficil ah sida in loo hagayo hay'ado bulsho, loo diyaariyo maxklamadda inuu ka caddeeyo arrinkiisa iyo loo raaco marka hore ee la maqlayo arrintiisa. Adeeggaas oo dhan waa lacag la'aan waana xog sir ah.

Waad la xiriiri kartaa xarunta is-gaarsiinta si aad ula hadasho mid ka mid ah Dadka u Dooda Kuwa la Dulmay. Dadka u Dooda Kuwa la Dulmay waa iskood wax u qabtayaal ku siinaya taleefan aad kala xiriirto haddii laguugu dulmay shaqsiyan ama musiibo ku gaadho.

**Taleefan:** 403-428-8398
Insiin – Khamiis 8 a.m. to 9 p.m.
Jimce 8 a.m. – 4 p.m.

## Is-diiwaangelinta qofka maatada ah (daciifka)

Adeegga Boliiska ee Kaalgari wuxuu sameeyay meel lagu keydiyo bayaanka dadka oo ay isku diiwaan gelin karaan haddey asiibto dhib jismi, miyir ama xaalad caafimaad, ama naafada korriinka oo ay u baahdaan fiiro gaar ah oo deg-deg ah.

Haddaad tahay qof tabar yar ama aad heyso qof daciif ah, waxaan kaa rabnaa inaad na soo war geliso. Sirtaada waa la ilaalinayaa warka aad noo sheegtana waxaa isticmaalaya keliya dadka ugu horreyntii kuu gurmanaya si ay kuu caawiyaan adiga iyo gacalkaaga markaad halis gashaan.

Wa iskaa isu diiwaangelin, marka qofka ama daryeelaha waa inuu warbixinta geliyaa nidaamka iyo inuu ku daro wixii is beddel ah. Warbixinta ku jirta diiwaanka waxaa la eegayaa keliya markuu qofka tabarta yar qatar galo ama ciriiryoodo xaalad deg-deg ah awgeed, waxaana loo isticmaalayaa isagoo keliya in lagu caawiyo. Adeegga Boliiska ee Kaalgari, Qeybta Dabdamiska iyo Gargaarka Degdegga ah ee Caafimaad, ee loo yaqaan ambalaas, waxay heli karaan warbixintaada si aamin ahna waxaa u keydiya Adeegga Boliiska ee Kaalgari. Diiwaanka looma istcimaalayo in loo kaashado dambi baarista.

Warbixin dheeraad ah ka hel www.calgary.ca/disabilityvpr ama email u dir vulnerablepersons@calgarypolice.ca.

## Shaqaaleyn

Unugga shaqaaleynta ee Adeegga Boliiska ee Kaalgari (CPS) wuxuu rabaa adeegga inay ka muuqdaan noocyadaaa bulshada uu u shaqeeyo. CPS waxay si firfircoon u raadisaa shaqaale noocyada bulshada ka socda oo leh waayo aragnimo luqado kala duwanna ku hadli kara.

Ugu yaraan waa inaad heysataa:

- Shahaadada 12 ama mid u qalanta (Hadduu dibadda wax ku bartay inuu qiimeeyn ka keeno Adeegga Qiiimenyta Caalamiga (IQAS) http://work.alberta.ca/immigration/international-qualifications-assessment-service.html )
- Tahay Kanadiyaan, degganaansho qabo markaas, ku noolaa Kanada ama Ameerika u rayaan 3 sano
- Ugu yaraan 18 jir

Warbixin dheeri ah

**Taleefan:** 403-428-8483 or 1-866-277-4473
**E-mail:** cpsrecruiting@calgarypolice.ca
**Website:** join.calgarypolice.ca

Waad ka qeyb geli kartaa fadhiyada warbixinta ee ku liis gareysan websaaytkeenna.

Waxaan ku boorrineynaa qof walba oo su'aal qaba inuu nala soo xiriiro iyo kii raba innuu codsado, shaqada wax ka sii ogaado ama saaxibkaa ama qof reerkaaga ah hadduu rabo inuu codsado.

## Dhallinta boliisnimada rabta

Waxaa jira saddex barnaamij oo dhallinta rabta Adeegga Boliiska Kaalgari loogu tala galay:

- Boliiska Kaalgary Barnaamijka Kaadirka
- Kuruudka Boliiska Kaalgari
- Akadeemiyaha Boliiska Yaryar

**Boliiska Kaalgari Barnaamijka Kaadirka**

Boliiska Kaalgari Barnaamijka Kaadirka waxaa loo qoondeeyay qofkii ka weyn 18, oo raba meherad boliisnimo.

Barnaamijka Kaadirka waa shaqo gaar ah iyo tababar Adeegga Boliiska ee Kaalgari bixiyo siinaya dadka fursad ay ugu shaqeeyaan Adeegga Boliiska Kaalgari iyagoo la shaqa galaya saraakiil boliis loo dhaariyay ee Saldhigyada Xaafadaha. Barnaamijka Kaadirka waa la mid ah shaqo-barashada lacagta lagu qaato wuxuuna indhaha u furaa inay bartaan boliisnimo iyadoo lacag ku qaadanaya helayana tababar qiimo leh.

Kaadiriinta waxay ka xaadiraan shan usbuuc oo tababar lacag lagu siinayo meesha Calgary Police Service Chief Crowfoot Learning Centre, halkaana ka helaan aasaaska barasho ee xirfadaha is-xiriirinta, qoridda warbixinta, war qaadista, iyo warbixinta booliis ee bulshada ee ka tareysa inay buuxiyaan mas'uuliyadda hormuudnimada ee Xaafadda. Kaadiriinta waxay sameeyaan carbis iyo jir-dhiska.

Kaadirka wuxuu ka caawiyaa saraakiisha boliiskas warbixinta shilalka taraafikada, siiyaa wararka bulshada iyo hagidda macluumaadka guud, bilaaba dhacdooyinka warbiximeed si uu u caawimo Adeegga Boliiska Kaalgari ee dhaartay waqiga warbixinta.

War dheeri ah booqo www.calgarypolicecadets.ca.

**Kuruudka Boliiska Kaalgari**

Kuruudka waa barmaanij dhallinta oo ku saleysan barnaamjiyada Kuruudka Militari ee Kanada.

Kuruudka Boliiska Kaalgari wuxuu dhallinta siiyaa jaanis gaar ah uu kaga qayb galo si koox fiican u wada shaqeyn isagoo helaya waaya-aragnimo boolisnimo. Xoogga waxaa la saaraa boliisnimada iyadoo la barayo hoggaaminta, waddaninimada, aqoonta, jir-dhiska, laga soo saarana qof isku kalsoon, u daneyn iyo waaya-aragnimo ka caawinta hormarkooda shaqsi. Dhallinta kuruudka gasha waxay baranayaan bulshannimo, laga soo saaraa qof isku kalsoon oo xushmad leh. Xubnaha waxay hogaamiyaan filkooda dhinac ficil keliya iyo eray ma aha, ee xitaa way ka dhex muuqdaan. Kuruudka Boliiska Kaalgari waxaa dhaliyay dadaalka xubnaha Adeegga Boliiska ee Kaalgari si ay u soo saaraan una qabtaan barnaamij soconaya oo taabba gal u ah dhallinta meeqaamo kala duwanna leh.

Waa lacag la'aan inaad gasho Kuruudka Boliiska ee kaalgari, direyska iyo qalabkana waa lagu siinayaa.

**Akadeemiyaha Boliiska Yaryar**

Akadeemiyada Boliiska Yaryar ee usbuuclaha ah waxay dhallinta jirta 12 ilaa 16 siisaa fursad ay ku bartaan waxa ay sarkaalnimo boliis tahay. Waxaa la qabtaa sannadkii 3 jeer, xilliga guga iskuulku xiran yahay iyo laba goor xagaaga.

Dhallinta Akadeemiyada waxay helaan waaya-aragnimo iyagoo u guda galaya nolosha sarkaalka boliiska ah ee Kaalgari. Si aad ah bay ugu dhowaadaan dhinacyo badan oo boliisnimada ku saabsan, sida:

- HAWCS helikoobtaro
- Hubka boliiska baaxaddisa
- Diba ku ceyrsi gaari
- Unugga daroogada
- Unugga Meelaha Dambiga ka dhaco
- Kooxda Taatikada
- Unugga Taraafikada iyo siyaado

Usbuuca waxaa lagu soo xiraa carrurta oo farsada gaardi dmaashaad ah ku mara lana siiyo shahaadooyin.

U sheeg dhallinta, ha u soo diraan foom dalab ah iyo curis (aan ka badneyn 250 eray) sheegayana sababta ay u rabaan inay ka qayb galaan. Foomka dalabka iyo warbixinta waxaad ka heli at www.calgarypolice.ca.

War bixin dheeraad ah, email YouthMentorship@calgarypolice.ca.

## Ammaan ama dhaliillo ku saabsan Adeegga Boliiska Kaalgari

Adeegga Boliiska Kaalgari maqsuud ayuu ka yahay warcelin in laga siiyo adeegyada uu siiyo reer Kaalgari. Hadaad wax fiican kala kulantay Adeegga Boliiska Kaalgari, fadlan shaqaalaheena u sheeg inaad maqsuud ku tagay shaqada weyn ay qabtaan. Waad nala wadaagi kartaa wixii amaan ah waadna naga warbixin kartaa wixii dhaliil ah ee la xiriira siyaasaddeena, adeegga ama falalka saraakiisha boliiskana u gudbi Qeybta Xirfadda Asaasiga. Qeybta Xirfadda Asaasiga waxaad kula xiriiri kartaa by email PSS@calgarypolice.ca ama taleefan 403-428-5904.

Ammaanta iyo dhaliilaha waad la wadaagi kartaa shaqsi ahaan cinwaanadan:

Calgary Police Service
Professional Standards Section #811
Westwinds Campus East Building
5111 47 St NE
Calgary, AB T3J 3R2
Isniin ilaa Jimce, 8 a.m. to 4 p.m.

AMA

Calgary Police Commission
Suite 650, 615 Macleod Tr. SE
Calgary, AB T2G 4T8

Amaaanta iyo dhaliilaha la wadaagi kartaa internet-ka u email-garee pss@calgarypolice.ca ama booqo http://www.calgarypolice.ca.

## Kheyraadka (Resources)

### Adeegga Boliiska Kaalgari

Boliiska/Ambalaas/Dabdamis leenka. ............................................................9-1-1
Adeegga Boliiska Kaalgari deg-deg la'aan ..........................................403-266-1234
Burcadka ka Caawin leen..................................................................... 403-428-8191
Kooxda Caawisa Dhibbanayaasha........................................................403-428-8390
Shaqaaleynta.........................................................403-428-8483 or 1-866-277-4473

### Kheyraadka Kaalgari & Alberta

211 Alberta (ee bulshada iyo adeegyada dadka)................................................2-1-1
311 Calgary (24 saacadood).....................................................................3-1-1
Isgaarsiin Caafimaad (24 saac).......................................................................8-1-1
Xarunta Mixnadda..............................................................................403-266-4357
Shabagadda isku-xirka qoyska iyo dhibka jinsiga (24 saac)................403-234-7233
Kerby Duqeyda dhibideeda Leen (24 saac)..........................................403-705-3250
Xarunta Talada ee Kaalgari ...................................................................403-691-5991
Taleefanka Caawinta Caruurta..........................................................1-800-688-6868
Adeegga Soo-Galootida Kaalgari..........................................................403-266-2486
Ururka Haweenka Soo-Galootida Kaalgari...........................................403-263-4414
Xarunta Dadka Cusub.........................................................................403-569-3325

CALGARY POLICE DIVERSITY RESOURCE

CALGARY POLICE SERVICE